AQOONSIGA AQOONTA LUUQADO BADAN

# GOBOLKA MAINE

Dhulka imika loo yaqaan Maine wuxuu hoy u yahay hidde qoto dheer oo waaraya oo luuqadeed. Awoodda ku hadlidda ka badan hal luuqad kaliya ma aha awood waxbarasho—waa milicsiga joogtayn dhaqameed, aqoonsi, iyo ku xirnaan bulsho.



**FRED RAVAN,**
**MACALLIN ISBAANISHKA DHIGA & MADAXWAYNAHA *BARAYAASHA LUUQADAHA BADAN MAINE* (EMME)**

*"Aqoonsiga Aqoonta Luuqado Badan* ***waa sime cajiib ah ardayda dhexdooda*** *sababtoo ah wuxuu u saamaxaa inay ka qaybqaataan ardayda laga yaabo inaysan ka qaybgali kareen barashada luuqadda. Xaqiiqdii, waxaanu ogaanay qaab aanu uga qaadi karno imtixaanka* ***ardayda oo dhan fasalada kala duwan*** *si aanu markaa u raadraaci karno guulaha luuqadda ay ka sameeyaan sanadba sanadka ka dambeeya."*



Ardayda Dugsiga Sare ee Bangor helayaasha 2024-2025

Somali

## KU SAABSAN AQOONSIGA AQOONTA LABA LUUQADOOD

Kani waa aqoonsiga rasmiga ah ee uu bixiyo gobolku ee lagu dhejiyo dibloomada iyo taraanisikiribka dugsiga sare ee ardayga si loo sharfo inuu yaqaano laba ama ka badan oo luuqadood.
Waxa heli kara dhammaan ardayda, oo ay ka mid yihiin kuwa afkooda hooyo ku hadla kuwaasi markii u horraysay ku bartay luuqad aan Ingiriisi ahayn guriga.



**BOBIN PARK, ARDAY DHIGTA BOWDOIN**

*"Ahaanshaha mid ku hadla luuqado badan waxay ii saamaxdaa inaan aqoon badan u yeesho dhaqankayga anigoo dhinaca kalena ballaarinaya aragtidayda ku aaddan caalamka."*



**PAULINA SARGENT,**
**MACALLIN ISBAANISHKA DHIGA**

*"Aqoonsiga Aqoonta Luuqado Badan waxay u keentaa aqoonsi u qalma dadaalka ardaydayda.* ***Waxaanu fiirinaa khariiradda dhaashboorka DOE oo*** *waxaanu dareenaa qab markaan aragno in dugsigayaga yar la matalayo."*

## BILAABIDDA

Buuxi shuruudaha soo socda si aad u kasbato Aqoonsiga Aqoonta Luuqado Badan markaad qalinjabinayso.

- Xariif ku ahaanshaha Ingiriisida *(qalinjabinta dugsiga sare)*
- Xariif ku ahaanshaha luuqad labaad *(qiimaynta luuqadaha adduunka)*

U gudbi codsigaaga dugsigaaga ugu dambayn Julaay 30-keeda. Ma jirto khidmad dheeraad ah gudbinta codsiga kadib markaad bixisay lacagta ee aad gashay imtixaanka luuqaddaada.

Shahaadadu waxay waynaysaa xirfadaha luuqadda ardayga oo ah hanti qiime badan, waxay xaqiijisaa hiddaha iyo dhaqankooda, waxayna iftiimisaa u diyaar ahaanshahooda kuuliyad, shaqo, iyo fursadaha caalamka.

Waydii isku-duwaha Aqoonsiga Aqoonta Luuqado Badan ee dugsigaaga sare macluumaad dheeraad ah. Haddaad imikaba sii qorshayso wakhti kaama tagin!

# FAA'IDOOYINKA AQOONSIGA AQOONTA LUUQADO BADAN

Ardaydu waxay ka helaan faa'idooyin macne badan, dhab ah kasbashada Aqoonsiga, marka laga tago gudbidda imtixaanka.

## 1. KUULIYADDA



### DHIBCAHA KUULIYADDA MAINE

Arrinta ugu wayn ee ardayda badankooda ku dhiirigalinaysa inay helaan Aqoonsiga waxay ahayd dhibcaha kuuliyadda. Maine waxay leedahay 6 kuuliyadood oo bixiya dhibcaha kuuliyadda iyagoo ku beddelanaya Aqoonsiga Aqoonta Luuqado Badan (laga bilaabo Agoosto 2025).

**Jaamacadda Maine ee Farmington**
6 dhibcood

**Jaamacadda Maine ee Orono**
6 dhibcood


**Jaamacadda Maine ee Machias**
6 dhibcood

**Jaamacadda Southern Maine**
8 dhibcood

**Kuuliyadda Bulshada Southern Maine**
8 dhibcood

**Jaamacadda Husson**
6 dhibcood

**Waxaanu ku talinaynaa inaad ka hubiso kuuliyaddaada hadday kaliya aqbalaan imtixaan gaar ah.



**82.6% HELAYAASHA AQOONSIGA AQOONTA LUUQADO BADAN WAXAY ISDIIWAAGELIN KUULIYAD**

(laga bilaabo Agoosto 2025).

### OGGOLAANSHAHA KUULIYADDA

Ka sokow dhibcaha kuuliyadda, Aqoonsigu waa abaalmarin. Maadaama oggolaanshaha kuuliyaddu sii adkaanayo, aqoonsigan waxay xafiisyada oggolaanshaha kuuliyaddu u tixgaliyaan shahaado muujinaysa guul wayn.



### JAAMACADDA MAINE FARMINGTON

**LISA ELLRICH, AGAASIMAHA OGGOLAANSHAHA**

**Ardayda haysata aqoonsigan waxay ku astaysan yihiin** inay yihiin ardayda dadaal badan oo ka faa'idaysta fursadda soo marta oo heer sare ka gaaray barashada luuqadda. Sidoo kale **wuxuu muujinayaa dhinac ardaygu leeyahay oon si cad uga muuqan karin** marka isha la mariyo taraaniskirib.

**Jaamacadda Maine ee Farmington waxay ugu dabbaaldegtaa ardaydan** inta ay socdaan dhawr fantasiye sanad kasta. Waxaanu siinaa qaabab ay uga qaybqaataan la wadaagista afkooda hooyo bulshada kambaska waxaanan taageernaa 100% intay hawsha wadaan! Waxaanu ku han waynnahay guusha ay gaareen **waxaanan rabnaa inay dareemaan qab** sidoo kale.

Barashada luuqaddu waxay u furtaa albaabo xiriirka iyo isdhaafsiga dhaqan —caalamka iyo halkan Maine labadaba —isku furka bulshooyinka iyo xoojinta iskaashiga qaaradaha oo dhan.

## 2. SHAQAALAYNTA

Loo-shaqeeyayaal badan ayaa raadinaya shaqaale yaqaan luuqado badan si ay macaamiishooda u ballaariyaan. Shaqaalaha labada luuqadood yaqaan waxay u leeyihiin faa'idooyin badan shaqada, gaar ahaan markay joogaan goobaha uu qiimaha leeyahay la xiriiridda dad kala duwan.

### XAFIISKA MAINE EE KHAYRAADKA AADANAHA

Maine BHR wuxuu u aqoonsan yahay Aqoonsiga mid aqoonta luuqadda sheegaya. Shaqaalaha sidoo kale waxay codsan karaan gunnada dadka luuqadaha badan ku hadla si ay lacag ugu helaan ku hadlidda luuqad kale goobta shaqada.



**AMELIA LYONS RUKEMA, CEO**

### CAAFIMAADKA GUUR-GUURA EE MAINE

"Maadaama loo-shaqeeyuhu raadinayo shaqaale laba luuqadood ku hadla, Aqoonsiga Aqoonta Luuqado Badan waa daruuri! Wuxuu bixiyaa hab sahlan oo loo qiimeeyo xirfadaha luuqadda heerka aynu u baahannahay, taasi innoo tashiilaysa wakhti iyo lacag".

Ardaydu waxay ku xusi karaan Aqoonsiga waraaqahooga codsiga shaqada, codsiyada kuuliyadda, iyo agabka shaqada si ay u muujiyaan awoodahooda luuqadaha badan oo ay uga soocmaan ciddii la tartamaysa.